



## Qofka salaad ilaawa ha tukado markuu xasuusto, kafaaro gud kale malaha oo intaa ahayn

Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaade wuxuu Nabiga scw ka wariyey inuu yiri: "Qofka salaad ilaawa ha tukado markuu xasuusto, kafaaro gud kale malaha oo intaa ahayn:

{salaada u oog xuskayga} [suuratu Daaha:14]"

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey qofka ilaawa salaad faral ah ee waqtigeedii baxay, waxaa ku waajib ah inuu u deg-dego qalaynteeda marka uu xasuusto, dambiga ka tagida salaada laga dhaafimaayo oo Ilaahay ma asturayo in muslimku uu tukado markuu xasuusto maahee, Ilaahay ayaa kitaabkiisa ku yiri: {salaada u oog xuskayga dartii} [suuratu: daaha:14], oog oo tuko salaada aad ilawdo markaad xasuusato.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65088>

